Casharka 35

1. Markii Ilaah siiyey Muuse tobanka amarradood, wuxuu amray Muuse inuu u dhiso sheey. Muxuu ahaa wixii Ilaah weyddiistay in Muuse dhiso?
-Ilaah wuxuu Muuse ku amray inuu u dhiso isaga Taambuug.

2. Miyaa Ilaah u baahan yahay guri uu ku noolaado?
-Maya.

3. Waa maxay asbaabta Ilaah ugu baahday guri uu ku noolaado?
-Waayo Ilaah waa Ruux.
-Waayo Ilaah meel waliba ayuu joogaa wakhti waliba.

4. Muxuu ahaa cahdigii Ilaah la dhigtay reer binu Israa'iil?
-Haddii reer binu Israa'iil ay addeecaan amarkiisa ood handabadeeto Ilaah wuu barakadaynayaa, laakiin haddii ay addeeci waayaan amaradiisa ood han, dabadeeto wuu ciqaabayaa.

5. Miyaa reer binu Israa'iil awoodeen inay addeecaan amarrada Ilaah ood han?
-Maya.

6. Miyaa Ilaah garanayaa in reer binu Israa'iil aanay awoodin inay wada yeelaan amarraiisa?
-Haa.

7. Muxuu ahaa ciqaabtii Ilaah u dejiyey jebinta mid ka mid ah Amarradiisa?
-Dhimashada ruuxa ee Harada dabka ah ee daa'iman ololaysa ama cadaabta.



8. Muxuu ahaa habkii Ilaah keenay ee reer binu Israa'iil ay kaga baxsan kareen dhimashada dembiga?
-Markii reer binu Israa'iil ay dembaabaan oo jebiyaan mid ka mid ah amarrada Ilaah, reer binu Israa'iil waxay imanayaa Taambuugga oo waxay bixinayaa dhiigga xayawaanka.

9. Maxaa Ilaah samaynayaa markii uu arko dhiigga xayawaanka?
-Markii Ilaah arko dhiigga xayawaanka, wuxuu istaajinayaa ciqaabta ku soo fool leh reer binu Israa'iil ilaa laga helo qaab ka wanaagsan wax u bixinta dembiga.

10. Sidee baa Ilaah u doonaya in Muuse iyo reer binu Israa'iil ay u dhisaan taambuugga?
-Wuxuu doonayaa in loo dhiso si waafaqsan nidaamka Ilaah.

11. Muxuu ahaa magaca labadii qol ee Taambuuggu ka koobnaa?
-Meesha Qoduuska ah iyo Qoduuska Qoduusyada.

12. Muxuu ahaa magaca la siiyey sanduuqii Axdiga ee Ilaah Muuse ku amray inuu sameeyo oo uu geliyo Qoduuska Qoduusyada?
-Sanduuqa Axdiga.

13. Waa maxay macaaniga ilxidhka macbudka ka dambeeya ee kala qaybinaya Qoduuska qoduusyada iyo meesha qoduuska ah?
-Ilxidhku wuxuu reer binu Israa'iil xusuusinayaa in ay Ilaah kala dhaqaaqeen dembigooda awgii.

14. Maxaa Ilaah reer binu Israa'iil ugu amray inay gacantooda saaraan xayawaanka ay gowracayaan?
-Reer binu Israa'iil marka ay gacamta saarayaan madaxa xayawaanka, waxay taasu ka macne tahay inay Ilaah u qirtaan inay

dembaabeen oo ay ahayd inay dhintaan, iyo in Ilaah aqbalo dhimashada xayawaanka, laakiin qofku uusan dhiman.

15. Miyaa dhiigga xayawaanka awood u lahaa inuu bixiyo dembiyada Israa'iil?
-Maya.

16. Dabeeto maxaa sababay in Ilaah reer binu Israa'iil weyddiisto inay xayawaanka u bixiyaan dembiyadooda?
-Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil barayaa in ciqaabta dembigu ay tahay dhimashada.

17. Maxaa Ilaah samaynayaa marka uu arko dhiigga xayawaanka?
-Markii Ilaah arko dhiigga xaywaanka, wuxuu ka qaabanayaa reer binu Israa'iil ciqaabtii ku soo fool lahayd ilaa la helo wax bixin ka wanagsan dhiigga xoolaha.

18. Markii maalinta Ilaah doortay in Haaruun galo Qoduuska Qoduusyada ay timaaddo, maxaa Ilaah ku amrayaa Haaruun inuu soo qaato ama la soo galo Qoduuska Qoduusyada?
-Ilaah wuxuu Haaruun ku amrayaa inuu soo qaato dhiigga xayawaanka, oo uu la soo galo Qoduuska Qoduusyada.

19. Haddii Haaruun sameeyo waxa Ilaah ku amray, oo uu dhiig ku kor rusheeyo daboolka santuuqa Cahdisa, Maxaa Ilaah samaynayaa?
-Ilaah wuxuu ka qabanayaa ciqaabtii dembiga ee ku ima lahayd reer binu Israa'iil sannadaas, ilaa la helo wax bixinta dhiigga oo ka wanaagsan kan xoolaha.

-Marka Muuse joogay Buur Siinaay ee uu Ilaah la hadlayey, maxay reer binu Israa'iil samaynayeen?



Bal aynu akhrinno Baxniintii 32:1-6

1-Oo Markii dakii arkay in Muuse raagay oo uusan buurtii ka soo degin, ayaa dadkii iyagoo urursan Haaruun u yimaadeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Kac, oo inoo samee ilaahyo ina hor socda; waayo, Muusahan oo ah ninii i aga soo bixiyey dalkii Masar, garan mayno wax ku dhacay.
2-Markaasaa Haaruun wuxuu iyagii ku yidhi, Soo bixiya hilqadaha dahabka ah oo dhegaha ugu jira naagihiinna, iyo wiilashiinna, iyo gabdhihiinna, oo ii keena.
3-Markaaxaa dadkii oo dhammu waxay soo bixiyeen hilqadihii dahabka ahaa oo degaha ugu jiray oo waxay u keeneen Haaruun.
4-Kolkaasuu gacmahooda ka guddoomay, oo wuxuu ku xardhay alaabta wax lagu xardho, wuxuu ka sameeyey weyn dahab la shubay ah, oo waxay yidhaahdeen, Reer binu Israa'iilow, kanu waa illaahiinnii dalka Masar idinka soo waday.
5-Oo Harruun markuu arkay ayuu meel allabbari ka hor dhisay, markaasaa Haaruun ogeysiis ku dhawaaqay, oo wuxuu yidhi, Berri waa iiddii Rabbiga.
6-Markaasay subaxdii dambe aroor hore keeneen, oo waxay bixiyeen qurbaanno la gubo, oo waxay keeneen qurbaanno nabaadiino, makraasay dadkii u fadhiisteen inay wax cunaan oo waxay cabbaan, oo ay u keeneen inay cayaaraan.

-Maxay haddaba reer binu Israa'iil samaynayeen buurta hoosteeda?

-Reer binu Israa'iil waxay samaysteen weyl dahab ah, oo way caabudayeen.

-Maxaa haddaba amarka kowaad ee Ilaah siiyey reer binu Israa'iil ahaa?

-In Ilaah keliya uu yahay Ilaaha dadka oo dhan.

-Miyaa reer binu Israa'iil ay Ilaah wax kale ka hor-mariyeen?
-Haa.

-Muxuu ahaa amarkii labaad ee Ilaah siiyey reer binu Israa'iil?

-Inaan cidi ilaahyo samaysan oo caabudin.

-Miyaa reer binu Israa'iil samaysteen Ilaahyo qalaad oo caabudeen?

-Haa.

-Maalmo aan badnayn ka hor, Israa'iiliyiintu waxay lahaayeen waxaannu addeecaynaa amarrada Rabbiga oo dhan.

-Laakiin imminka, reer binu Israa'iil waxay jebinayaan labadii qaynuun ee ugu horreeyey ee Ilaah siiyey.

-Reer binu Israa'iil waxay arkeen Ilaah  oo toban belaayo ku soo dejinaya Fircoon iyo reer Masar.

-Reer binu Israaiil waxay kaloo arkeen Ilaah oo kala qaybinaya Badda Cas si ay jid uga helaan badda dhexdeeda.

-Reer binu Israa'iil waxay kaloo arkeen Ilaah oo burburinaya Fircoon iyo weliba ciidammadiisa markii ay soo galeen BAdda Cas.

-Reer binu Israa'iil waxay kaloo arkeen Ilaah oo iyaga u soo diraya digaagduureed iyo weliba manna laga soo diray samada.



-Reer binu Israa'iil waxay kaloo arkeen markii ay harraadeen Ilaah oo dhagaxa biyo ka siinaya.

-Haatanna, reer binu Israa'iil waxay caabudayaan weyl dahab ah, oo waxay leeyihiin waa weyshan dahabka ah tii Masar ka soo bixisay.

-Miyaa Ilaah  garanayey in reer binu Israa'iil ay caabudi doonaan weyn dahab ah?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 32:7-8

7-Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Kac oo hoos u deg, waayo, dadkaagii aad dalkii Masar ka soo bixisay, way iskharribeen.
8-Oo haddiiba way ka leexedeen jidkii aan ku amray, oow axay samaysteen weyl dahab la shubay ah, wayna caabudeen, oo allabbarina way u bixiyeen, oo waxaynu yidhaahdeen, reer binu Israa'iilow, kanu waa ilaahiinnii dalka Masar idinka soo waday.

-Miyaa Ilaah garanayaa in reer binu Israa'iil ay caabudayeen weyl dahab la shubay ah?

-Haa.

-Ilaah wuxuu arkay reer binu Israa'iil oo caabudaya weyl dahab ah.
-Ilaah wuxuu arkaa wax waliba.

-Ilaah wuxuu arkay in Aadan iyo Xaawo ay cuneen miraha laga mamnuucay inay cunaan.

-Ilaah wuxuu arkay oo kale Qaabiil oo dilaya Haabiil.

-Ilaah uxuu kaloo arkay dembiga dadka sharka leh ee Sodom iyo Gomorrah.

-Ilaah wuxuu kaloo arkay goortii Yuusuf ay walaaladiis addoon ahaan uga iibinayeen Masar.

-Ilaah wuxuu kaloo arkay dembi oo dhan, oo welibana Ilaah uu neceb yahay dembi kasta.

-Miyaa Ilaah u carooday reer binu Israa'iil?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 32:9-10

9-Kolkaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku y idhi, Anigu dadkan waan rkay oo waa dad madax adag, haddaba iska kay daa, aan aad ugu cadhoodee, oo aan kulligood baabi'iyeee, oo waxaan adiga kaa dhigi doonaa quruun weyn.

10-Haddaba iska kay daa, aan aad ugu cadhoodee, oo aan kulligood baabi'iyee, oo waxaan adiga kaa dhgi doonaa quruun weyn.

-Ilaah aad buu ugu carooday reer binu Israa'iil.

-Ilaah aad iyo aad buu ugu carooday oo wuxuu gaaray heer uu doono inuu iyaga ood han burburiyo.

-Maxaa haddaba Muuse uu ku yiri Ilaah?

Bal aynu ahrinno Baxniintii 32:11-14

11-Markaasaa Muuse baryay Rabbiga Ilaahiis ah oow uxuu ku yidhgi, Rabbiyow, maxaad aad ugu cadhoonaysaa dadkaaga



aad dalkii Masar kaga soo bixisay itaal weyn iyo gacan xoog leh?

12-Bal Masriyiintu maay u odahn doonaan, wuxuu iyaga u saaray xumaan inuu buuraha ku laayo iyo inuu dhulka iyaga ka baabi'iyo? Rabbiyow, ka leexo cadhadaada kulul oo ka noqo xumaantan aad damacsan tahay inaad dadkaaga ku samaysid.

13-Bal xusuuso addoommadaadii ahaa Ibraahim, iyo Isxaaq, iyo Israa'iil, oo aad naftaada ugu dharatay, oo aad ku tidhi, Farcankiinna waxaan u badin doonaa sida xiddigaha cirka, oo dalkan aan ka hadlay oo dhan waxaan siin doonaa farcankiinna, wayna dhaxli doonaan weligood.

14-Markaasaa Rabbigu ka noqday xumaantii uu damacsanaa inuu dadkiisa ku sameeyo.

-Waa maxay asbaabta Ilaah aanu reer binu Israa'iil u burburinin?

-Waayo Muuse ayaa Ilaah ka baryey inaan reer binu Israa'iil la burburinin.

-Muuse wuxuu yiri, haddii Ilaah burburiyo Israa'iil, reer Masar ayaa ku qoslaya oo ku doodaya in Ilaah reer Israa'iil dibadda u saaray si uu buuraha ugu laayo.

-Muuse wuxuu kaloo Ilaah ku yiri, xusuuso cahdigii Ibraaim iyo Isxaaq, iyo Yacquub aad la dhigatay ee aa ku tiri, waxaan farcankiinna ka dhigyaa quruun weyn.

-Wayo Muuse ayaa Ilaah u baryey reer binu Israa'il, Ilaahna ma uusan burburinin Israa'iil.

-Dabadeeto, Muuse wuxuu ka soo degay Buur Siinaay.

-Maxaa Muuse sameeyey markii uu Buur Siinaay hoosteeda

yimid?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 32:15-19

15-Markaasuu isna ku yidhi, Haddaba haddaanad ila socon, halkan ha naga kaxayn.
16-Waayo, sidee baa lagu garanayaa inaad raalli naga tahay, aniga iyo dadkaagaba? Miyaanay ahayn inaad nala socoto si aannu aniga iyo dadkaaguba uga duwanaanno dadka dhulka jooga oo dhan?
17-Oo markii Yashuuca maqlay qayladii ay dadku ku qaylinayeen ayuu Muuse ku yidhi, War xeradii qaylo colaadeed baa ka yeedhaysa.
18-Markaasuu ku yidhi Kaasu ma aha codkii kuwa guulaysta, mana aha codka kuwa laga adkaado, laakiinse waxaan maqlayaa kuwa gabyaya codkood.
19-Oo markuu xeradii ku soo dhowaaday wuxuu arkay weyshii iyo cayaartii, markaasaa Muuse aad u cadhooday, looxyadiina gacmhiisa wuu ka tuuray oo wuxuu ku jejebiyey buurta hoosteedii.

-Muuse aad iyo aad buu ugu cadhooday reer binu Israa'iil, sababtaas aawadeed ayuu kala jebiyey labadii loox ee sharcigu ku qornaa.

-Maxaa haddaba Muuse sameeyey?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 32:20

20-Markaasuu weyshii ay samaysteen qaaday, dab buuna ku gubay oo daqiijiyey, oo intuu biyaha ku dul daadiyey ayuu reer binu Israa'iil cabsiiyey.



-Muuse wuxuu burburiyey weyshii dahabka ahayd, oo markuu daqiijiyey dabadeed ayuu biyaha ku kor shubay, oo wuxuu ku khasbay inay reer binu Israa'iil cabbaan biyihii dahabka la daqiijiyey lagu daadiyey.

-Maaddaama Muuse uu jebiyey labadii dhagax ee sharciga ee Ilaah ku qoray tobanka amarradood, maxaa Ilaah u sheegay in Muuse sameeyo?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 34:1-2

1-Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Waxaad soo qortaa laba loox oo dhagax ah oo kuwii hore u eg, oo waxan looxyada ku qori doonaa erayadii ku qornaa looxyadii hore, oo aad jebisay.
2-Oo subaxda diyaar ahow, oo Buur Siinay subaxda soo fuul, oo halkaas buurta dusheeda ah iigu kaalay.

-Muuse wuxuu addeecay Ilaah, wuxuuna qoray laba dhagax, oo uu u qoray sida loox oo kale, , markaasuu labadii loox la aaday buurta dusheeda.

-Markii uu yimid buur Siyoon, ayaa Ilaah wuxuu mar kale ku qoray tobankii amar looxyadan cusub ee dhagaxa ah.

-Miyaad xusuusataa haddaba in Ilaah Muuse u sheegay in reer binu Israa'iil ay Rabbiga taambuug u dhisaan?

-Wakhti kaddib, reer binu Israa'iil waxay reer binu Israa'iil taambuugga u dhiseen isla sidii Ilaah ku amray ee uu u sheegay Muuse.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 39:42-43 & 40:17

42-Oo kulli wixii Rabbigu Muuse ku amray ood han reer binu Israa'iil sidii bay hawshii u wada qabteen.
43-Markaasaa Muuse wuxuu arkay shuqulkii oodhan, oo bal eeg way wada sameeyeen; sidii Rabbigu ku amray ayay u sameeyeen; markaasaa Muuse iyagii u duceeyey.
17-Oo sannaddii labaad, bishedii kowaad, maalinteedii kowad ayaa taambuuggii la qotomiyey.

-Reer binu Israa'iil waxay dhiseen taambuuggii isla sida Ilaah u sheegay, oo waxaa taambuuggii soo shex galay ammaantii Rabbiga.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 40:34-35

34-Markaasaa daruurtii teendhadii shirka qarisay, ammaantii Rabbiguna taambuuggay ka buuxsantay.
35-Oo Muusena inuu teendhadii shirka galo wuu kari waayay, maxaa yeelay, daruurtii baa dul joogtay, oo ammaantii Rabbiguna taambuuggay ka buuxday.

-Haddii reer binu Israa'iil aanay u dhisin teendhda sidii Ilaah doonayey ee uu iyaga u sheegay, miyaa ammaanta Rabbigu halkaas soo geli lahayd?

-Maya.

-Maaddaama reer binu Israa'iil ay taambuugga u dhiseen isla sida Ilaah doonayey, ayaa keentay in ammaantii Rabbigu soo dhex gasho teendhada.



-Ma waxay ahayd in reer binu Israa'iil ay Ilaah ugu sood howaadaan jidadkooda?

-Maya.

-Muxuu ahaa dariiqa keliya ee reer binuIsraa'iil ay ugu soo dhowaan kareen Ilaah?

-Dariiqa ay ugu iman kareen wuxuu ahaa dariiqa Rabbiga.

-Sidee baannu ku ogaanaynaa dariiqa Rabbiga?

-Waxaan ka ogaanaynaa kitaabkiisa Baybalka.